

IRB# \_\_\_\_\_ PI: \_\_\_\_\_

### Ogolaashaha Ka Qeybqaadashada Cilmibaarista

Waxaa lagu weydiistay in aad ka qeyb qaadato daraasad. Ka qeybgalka cilmi baaristan way ka duwan tahay daryeelka caafimaadka ee lagu fidiyo. Ujeedada cilmi baaristan waa in ay mustaqbalka ka faa'iideystaan bukaanka iyo guud ahaan bulshada. Natiijada ka soo baxda daraasadda waxaa laga yaaba in ka qeyb galayaasha ka faa'iideystaan ama aanay ka faa'iideysan.

Inta aadan ogolaan, Cilmi baaruhu waa inuu kuu sheegaa (i) maxaa cilmi baarista loo sameynayaa iyo waxyaabaha lagaa doonayo in aad samayso inta ay daraasaddu socoto; (ii) waa qeybtee qeybta daraasadda ka mid ah ee cilmi baarista loogu talo galay intee ayeyse soconeysaa (iii) khatarta laga yaabo, dhibka ka iman kara, iyo faa'idada ka dhalan karta cilmi baarista; (iv) waxyaabaha kale ee daawada kuu noqon kara haddii aadan ka qeyb qaadan cilmi baarista; iyo (v) cidda arkaysa diiwaaanka daraasadda oo ogolaanaysa macluumaadkaaga iyo sida loo xafidayo macluumaadka.

Marka ay suurto galka tahay. Cilmi baaruhu waa inuu kuu sheegaa (i) sida aad ku heleyso daryeel, iyo cidda kharashka bixinaysa, haddii uu dhaawac ku gaaro ama aad wax ku noqoto cilmi baarista; (ii) sida ay suurto gal u tahay in ay jiraan khatar aan la garanayn; (iii) waxyaabaha aad ku ogaato baaritaanka ayaa laga yaabaa in ay kaa joojiyaan in aad ka qeyb qaadato cilmi baarista; (v) maxaa dhacaya haddii aad go'aansato in aad joojiso in aad ka qeyb qaadato qaadato; (vi) goorta lagu sheegayo waxyaabaha lagu ogaado cilmi baarista kuwaas oo raad saameyn ku yeelan kara doonistaada in aad ka qeyb qaadato ah iyo (vii) imisa qof ayaa ka qeyb qadanaya daraasadda.

Haddii aad ogolaato in aad ka qeyb qaadato, waa in aad saxiixdaa qoraalkan Waxaa kale oo lagu siin doonaa nuqul ogolaashaha ka qeyb galka daraasaddan oo ku qoran afka ingiriisiga.

Fadla la soo xiriir cilmi baaraha, Dr. \_\_\_\_\_ oo laga helo telfoon lambarka \_\_\_\_\_ markasta oo su'aal ka qabto cilmi baarista ama aad la kulnato wax dhibaato ah mudada cilmi baaristu socoto.

Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa guddiga KUMC oo lagaala xiriir karo (913) 588-1240 haddii aad waxa su'aal ah ka qabto ka qeyb galka cilmi baaristan.

Cilmi baarista waa mid aanay cidina kugu khasbin, waxaadna ra'yigaaga bedeli kartaa markii aad doonto. Wax ciqaab ah laguma marinayo haddii aad go'aan ku gaarto in aadan ka qeyb qaadan, ama haddii aad biloowdo ka qeyb qaadashada cilmi baarista oo aad ra'yigaaga bedesho. Si kastaba arrintu ha ahaatee, waxaa lagu fidinayaa addeegii caafimaadka ee aad ka heli jirtey Xarunta Caafimaadka ee Jaamacadda Kansas(KUMC)

Haddii aad saxiixdo qoraalkan, waxa ay ka dhigan tahay iyada oo qoraalka asalka ah ee ku qoran afka Ingiriisga afka lagaaga tarjumay, isla markaana lagaaga jawaabay wixii su'aalo ah ee aad qabtay oo iyada oo cidina aanay kugu khasbin aad ogolaatay in aad ka qeyb qaadato cilmi baaristan.

Magaca Sadexan ee Ka Qofka Ka Qeyb Qaadanaya Cilmi Baarista

Saxiixa Qofka ka Qeyb Qaadanaya Cilmi Baarista

Taariikh

Qofka Tarjubaanka ah/Qofka ka Maragkacaya Ogolaashahan

Taariikh